



Fayraska West Nile (WNV)

Xaashida xaqiqaada



Fayraska West Nile (WNV) waxaa badanaa laga qaadaa qaniinyada kaneecada cudurka qabta. Fayraska WNV waxaa sidoo kale lagu kala qaadi karaa dhiig ku shubista, ku tallaalida xubnaha jireed, naasnuujinta, waxaana kala qaadi kara hooyada ilaa dhallaanka wakhtiga uurka.

Qof kasta ayaa qaadi kara fayraska WNV, balse dadka wakhtiga ku qaata guriga bannaankiisa ayaa halis sarreysa ugu jira. Fayraska WNV sidoo kale wuxuu ku dhici karaa fardaha, shimbiraha, iyo xayawaanka kale.

Astaamaha iyo Calaamadaha



Qandho ama Qarqaryo



Daciifnimo



Madax-xanuun



Jir iyo Murqo Xanuun



Maskaxda oo Bararta



Jahawareer



Barkindhac



Kooma/Miyir-beel

Dadka qaarkood ee uu ku dhaco fayraska WNV ma yeeshaan wax calaamado jirro ah. Dad yar oo uu ku dhaco fayraska WNV ayaa muujiya calaamado iyo astaamo fudud, kuwaasoo badanaa bilawda 3 ilaa 15 maalmood kadib marka ay dhacdoo qaniinyada kaneecada cudurka qabta. Kuwani waxaa ka mid ah qandho, madax xannuun iyo jir xanuun, daciifnimo, iyo matag. Dadka intooda badan ee yeesha calaamadaha iyo astaamaha fudud ayaa si buuxda u bogsada, balse daalka iyo daciifnimada ayaa socon kara toddobaadyo ama bilo.

Dadka uu ku dhaco fayraska WNV waxay dhif iyo naadir u yeeshaan jirro aad u daran oo saameeya maskaxda iyo hareeraha maskaxda. Calaamadaha iyo astaamaha waxaa ka mid ah qandho daran, madax-xanuun, barkindhac, jahawareer, kooma/miyir-beel, iyo cuuryaanimo.

Jirro daran ayaa ku dhici karta qof kasta, si kastaba ha ahaatee dadka ka weyn 60 sanno jir ayaa khatarta ugu sarraysa ugu jira. Dadka qaba xaaladaha caafimaad qaarkood ayaa iyaguna halis weyn ugu jira. Tiro yar oo dad ah oo ay ku dhacdoo jirro daran ayaa u dhinta.



La hadal dhakhtarkaaga haddii aad yeelato mid ka mid ah calaamadaahan ama astaamahan. Dhakhtarkaagu waxaa laga yaabaa inuu dhiig kaa qaado iyo dareere laf-dhabar si uu u baaro fayraska WNV. Ma jirto daaweyn gaar ah oo loogu talagalay fayraska WNV. Jirrada daran ee laga qaado fayraska WNV ayaa sida caadiga ah u baahan taageero daaweyn oo lagu bixiyo gudaha isbitalka.


Kahortag Fayraska West Nile

Sida ugu fiican ee looga hortagi karo fayraska WNV waa inaad iska ilaalsaan adiga iyo qoyskaaga inay kaneeco idin qaniinto.



Isticmaal sunta cayayaanka kahortaga ee ay EPA ansixiyeen ee maqaarka/jirka loogu talagalay sida:

- Sunta DEET
- Saliida Lemon Eucalyptus
- IR 3535
- Sunta Picaridin



Xiro shaar gacmo-dheer ah iyo surwaal lugo dheer markaad bannaanka joogto



Isticmaal kareemka iyo sunta cayayaanka ee dharka ee permethrin



Ka takhalus goobaha ay kaneecadu ugxanta ku dhali karto adigoo qallajinaya biyaha fadhiya ee ku jira bannaanka guriga

Biyaha fadhiya waa in la qallajiyo/miilo/nuugo ugu yaraan hal mar toddobaadkii. Kuwani waxaa ku jira baaldiyada, baaquliyada rabaayadaha, iyo baafafka shimbiraha. Sidoo kale waxaad daldaloolo u yeeli kartaa waxyaabaha ay ka midka yihii taayarada/sheeggaga iyo baaldiyada bannaanka looga tagay oo ay biyuhu fadhiistaan. Kahortagga dheeraadka ah waxaa ka mid ah iska ilaalinta imaanshaha bannaanka waaberiga iyo maqribia marka kaneecada ugu badani ay jirto iyo hagaajinta daloolada ku yaala albaabbada iyo muraayadaha daaqadaha.

Wixii xog dheeraad ah, Booqo:



1. www.maine.gov/dhhs/westnile
2. www.maine.gov/dhhs/mosquitofaq (Si aad uga hesho su'aalaha inta badan la isweydiyo ee kaneecada)
3. www.cdc.gov/westnile
4. www.epa.gov/insect-repellents/find-repellent-right-you (Si aad uogaato sunta cayayaanka kahortaga ee ay EPA ansixiyeen)

Waxaad sidoo kale ka wici kartaa Maine CDC nambarka 1-800-821-5821.